



## **URUR SIYAASADEEDKA IFIYE EE DOWLADA PUNTLAND EE SOOMAALIYEED**

### **1. HORDHAC**

Urur Siyaasadeed **IFIYE** waxa uu u taagan yahay iftiiminta iyo horumarinta mustaqbalka bulshada reer Puntland. Ujeeddadiisu tahay in uu ka qabyqaato dhisimaha nidaam dawladdeed oo dimuquraadi ah oo casri ah, kuna qotoma dowladnimo dhab ah oo ay iska leeyihiin shacabka reer Puntland, rabitaankoodana ku go'aaminaya hannaanka dhaqan-dhaqaale, sharci iyo

Urur siyaasadeedka Ifiye waxuudiyaar u yahay hanashada hoggaanka si kor loogu qaado adeegyada bushada iyo horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha iyo hirgelinta nidaam siyaasadeed oo ku dhisan talo-wadaag iyo rabitaanka muwaadiniinta si waafaqsan dastuurka iyo xeerarka dowlada Puntland.

### **2. Aragtida Ururka (Vision)**

1. Aragtida Ururku waa taabogelinta bulsho horumarsan, xasiloon, lehna hanaan siyaasad oo daahfuran iyo islaxisaabtan, dhaqaale furfuran oo madaxbanaan, iyadoo bulshada loo jaheynaayo ka faa'iideysiga kheyraadka dalka.

### **2. Ujeedooyinka Ururka(Objectives)**

Ujeedada urur siyaasadeedka Ifiye ayaa ah:

- Dhismaha iyo horumarinta hay'adaha maamulka dawliga ah, saraynta iyo illaalinta sharciga si loo helo cadaalad looguna sinaado fursadaha iyo adeega dawlada.
- In la baahiyo xukunka lana gaarsiiyo ilaa heer degaan si loo xaqiijiyo gaarsiinta adeegyada aasaasiga ah, kala danbeyn ku saleysan sharciga, iyo horumarka miyi iyo magaaloba ah;
- In la dhiirrigeliyo wax soosaarka, iyo kobcinta horumarka dhaqaalaha, lana xaqiijiyo cadaaladda wadaagga kheyraadka dalka, si loo gaaro horumarka Muwaadinka iyo kan Danta Guud;
- In la yareeyo aqoondarida iyo saboolnimada, lana ciribtiro qabyaaladda, iyadoo la horumarinayo waxbarashada, cilmi baarista, hiddaha iyo dhaqanka, daryeelka caafimaadka, ilaalinta deegaanka.